



Baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki,-saddex jeer", qofkasta oo naga mid ah qalbigiisa wax baasaysiga ah baa ka dhacaaya laakiin Ilaahay wuxuu kaga dhaafaa tawakulka

Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay - naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- inuu yiri: "Baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki, baasaysigu waa shirki,-saddex jeer", qofkasta oo naga mid ah qalbigiisa wax baasaysiga ah baa ka dhacaaya laakiin Ilaahay wuxuu kaga dhaafaa tawakulka.

[Xadiis Saxyix ah] [Waa wariyay Abuu Daa'uud, At-Tirmidi, Ibnu Maajah, Iyo Axmed]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu ka digay baasaysiga, waana qofku inuu sharaysto wax uun ama wax la maqlo ha ahaato ama wax la arko ee, sida shimbiraha, xayawaanka, dadka naafada ah, lambarada, maalmaha, iyo wixii la mida. Nabigu scw wuxuu u soo qaatay shimbiraha aad ayaa loo yaqaanay waqtigii jaahiliga, waana shimbirta oo la duuliyo marka hawl la bilaabayo, sida safarka, ganacsiga iyo wixii la mida, haday u duusho xaga midig way bishaaraysan jireen, hawshoodana way ku dhaqaaqi jireen, hadayse u duusho xaga bidix way baasaysan jireen oo waxay rabeena way joojin jireen. Wuxuuna sheegay inay shirki tahay, laakiin sharaysigu wuxuu ahaa shirki, waayo kheyrka Ilaahay uun baa keeni kara, sharkana Ilaahay uun baa difaaca kaligi cid la wadaagtana ma jirto. Wuxuuna sheegay Cabdullaahi Binu Mascuud-Allaha ka raali ahaadee- inuu qofka muslimka ah qalbigiisa ku dhicikaro wax sharysi ka mid ahi, laakiin uu iskaga difaaco tawakulka Ilaahay la talo saaranayo, iyadoo la raacinayo in asbaabti lala yimaado.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3383>